

**Socotada ama dadka safraya waxay u baahan yihiin in ay cadeeyaan nooca baadhitaanka, isha baadhitaanka iyo shuruudaha natiijada dhukumintiyada ayaa looga baahan yahay meesha ay u socdaan ama u safrayaan. La xidhiidh diyaaradaada ama wakiilka safarka su'aalaha la xidhiidha shuruudahan.**

Shakhsiyaadka lagu baadhayo goobaha baadhitaanka bulshada ee loo yaqaano (surveillance testing sites), ee loogu talagalay ujeedada safarka, waa inay ogaysiiyaan ama u sheegaan isku-duwayaasha goobta baadhitaanka marka ay is diiwaan galinayaan. Goobaha Baadhitaanka waxa laga heli karaa: [Goobaha Baadhitaanka: Halkee laga helayaa baadhitaanta COVID-19 North Dakota \(nd.gov\)](#)

**Baadhitaanka/Tijaabada:**

- Nooca Baadhitaanaada/Tijaabooyinka la heli karo:
  - RT-PCR (nooc ah NAAT)
    - Laga qaadayo cunaha xagiisa danbe (Oropharyngeal/OP) ama xaga danbe ee sanko (Nasopharyngeal/NP)
    - **Natiijooyinka PCR KALIYA waxa la filan karaa in la helo 48-72 saacadood ka dib markay baadhitaankaagu soo gaadho shaybaadhka.**
  - Antijiin xawaare sareeyo (**MA AHAN** baaris PCR ama NAAT)
    - Laga qaadayo xaga hore ee sanko
    - Warbixinta natiijada waxa lagu heli karaa 60-90 daqiiqo
- Ka hor inta aanad helin baadhitaankaaga, ku dhamaystir **Hal mar** diiwangalinta testreg.nd.gov
  - Magaca lagu diiwangaliyey waa inuu waafaqsanyahay ama la mid yahay dhukumantiga loo isticmaali doono in lagu safro sida baasaaboorkaaga.
  - Waa in aad ogolaataa in aad ku hesho natijaadaada qaabka Fariin Qoraaleedka ama limaylka in laguugu soo diro natiijadaada qaabka wargalinta elektarooniga.

**Sideen u heli karaa NATIJJADAYDA:**

Shaybaadhka gobolku ma qabto shaqada **baadhitaanada** Maalmaha Axada. Sikastaba ha ahaatee, baadhitaanada la sameeyo usbuuca dhamaadkiisa waxa natiijadooda lagu heli doonaa 48-72 saacadood gudahood oo ka bilaabanta wakhtiga lasoo gaadhay ama la yimid shaybaadhka.

- **Barta Muwaadinkal:** Isticmaalka aan ku tiirsanayn ee natiijooyinka tijaabada ama baadhitaanka iyo warbixinada natiijada PDF ka ee daabacan.
  - Samee NDLogin akownti xiliga diiwangalinta ama ku xidhiidhi wargalinta qaabka elektarooniga
  - Kadib markii baadhitaankaagu soo baxay, gal Barta Muwaadinka testreg.nd.gov si aad u hesho natiijada baadhitaankaaga iyo qaabka daabacaada ee PDF
- **Sahaminta Onlaynka ah:** Dhamaystir sahamin onlayn ah si laguugu soo iimayl gareeyo nuqul ama koobi warbixinta natiijadaada PDF ahaan.
  - Codsiyada sahanka waa lala socdaa Isniin-Sabti laga bilaabo 8:00 am ilaa 7:00 pm
- Tag [Natiijooyinka Baadhitaanka | Waaxda Caafimaadka \(nd.gov\)](#) macluumaad faahfaahsan oo la xidhiidha helitaanka natiijooyinka

Shakhsiyaadka u baahan in laga caawiyo helitaanka natiijooyinka waxa ay:

- Soo wici karaan **Khadka tooska ah ee Natiijada** 701-204-6664, Isniin-Sabtida laga bilaabo 8:00 am ilaa 7:00 pm

## **Shuuradaha guud ee ay tahay in la tixgaliyo:**

### **Waaxda Caafimaadka ee North Dakota ma bixin karto nuqulka natiijada baadhitaan ama tijaabo lagu sameeyey shaybaadh kale ama baadhitaan ama tijaabo uu qaaday daryeel bixiye caafimaad oo gaar ah**

- Safar caalami ah: Xaqiiji hadii meesha aad u safrayso ay u baahan tahay natiijooyin lagu saleeyey xiliga bixitaanka ama xiliga imaatinka. Inta badan, waa wakhtiga bixitaanka laakiin marwalba ma aha. **Ka Xaqiiji diyaarada shuruudaha wakhtiga natiijada si aad u samayso baadhitaankaaga wakhtiga ku haboon.**
- Xogta macluumaadka qofka safraya (magaca, taariikhda dhalashada, iwm.) ee diiwaangalinta baadhitaanka waa inay la mid tahay dhukumantiga loo isticmaalayo safarka (sida.: baasaboorka).
- Nuqulada ama Koobiyada natiijada ee ay bixiyaan shaybaadhka gobolku waxaa ka mid ah macluumaadka diiwaangalinta baadhitaanka **lamana badali karo** lamana badali karo ka dib marka hawsha la dhaqaajiyo ama la socodsiiyo.
  - **RT-PCR warbixinada natiijooyinka daabacan PDR** ee shaybaadhka gobolka waxaa ka mid ah: ND State Seal, ND Cinwaanka Shaybaadhka Caafimaadka Dadwaynaha, Lambarka Muunada, Magaca Bukaanka, Taariikhda Dhalashada, Lab ama Dhadig, Isha Muunadda, Taariikhda/Wakhtiga ay heleen shaybaadhku, Taariikhda la Qaaday, Codsanaya Dhakhtar, Codsanaya Xarun/Goob, Magaca Tijaabada, Natiijooyinka, Tarjumaada, Taariikhda Baadhitaanka, saxiixa ogolaanshaha, Taariikhda Ogolaanshaha iyo Lambarka Shahaadada CLIA.
  - **Warbixinada natiijada antijiinka xawaaraha sareeyo** waxaa ka mid ah: Shaabadda Gobolka ND, Lambarka Kaadhka Aqoonsiga Baadhitaanka, Magaca oo dhamaystiran, Taariikhda Dhalashada, Magaca Xarunta la Codsaday, Nooca Tijaabada la Qaaday, Ilo Muunad, Taariikhda Muunada Laqaaday, Natiijada, iyo Taariikhda Natiijada.